# Shaqo bilaabista

## Hagis loogu talaggalay macaamiisha xerada qaxootiga



## 1. Xuquuda shaqo qabashada

**Waxaad hubsataa, inaad leedahay xuquuqda shaqo qabashada ee dalkaan finland iyo inkale.** Waxaad arrinkaan ka hubin kartaa go'aanka sharcigaaga degganaanshaha, kaarkaaga sharciga degganaashaha (ciqaamadda), ama haddii aad u baahah tahay waxaad weydiin kartaa caddaynta arrinkaas ku saabsan shaqaalaha xerada qaxootiga.

- haddii aad codsatay sharciga badbaadada kummeelgaarka ah, xuquuqdaada shaqo qabasho waxaa ay ka bilaabanaysaa isla maalinka aad codsiga samaysay
- haddii aad codsatay magangalyo qaxootinnimo, xuquuqdaada shaqo qabasho waxaa ay bilaabanaysaa saddex bilood kaddib marka aad codsiga samaysay, haddii aad howlwadeennada dowladda u dhiibtay ama tustay wax baasaboor ama dukuminti safar oo kale oo rasmi ah. Haddii aadan sidan wax baasaboor ama dukuminti safar oo rasmi ah, waxaa xuquuqdaada shaqo qabashadu ay bilaabanaysaa lix bilood kaddib marka ay ka soo wareegto gudbinta codsiga.

## 2. Heshiska shaqada

**Waxaad shaqo bixiyaha la gashaa heshiis qoraal ah.** Heshiiska shaqadu waa inuu ahaadaa mid waafaqsan sharciyada shaqada ee Finland, islamarkaana u hoggaansamaa heshiisyada shaqada ee xirfadaha kala duwan. Heshiiska shaqada waa in laga helaa xilliga shaqada ay bilaabanayso iyo xilliga ay dhammaanayso maalinkii, ama astaan muujinaysa in heshiisku uu yahay mid soconaaya illaa muddo aan la cayimin. Sidoo kale heshiiska waa in lagu qoraa saacadaha shaqada ee toddobaadkii/ bishii, inta uu le'eg yahay mushaarka shaqada ee saacaddii ama bishii iyo macluumaadka shaqo bixiyaha, sida magaca shirkadda ama shaqo bixiyaha. Haddii aad u baahato shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa kaa caawinaaya hubinta heshiiska shaqada.

Waa in aad heshiiska shaqada u keentaa shaqaalaha xeradaada qaxootiga, haddii aad ku nooshahay degaanka ay bixiso xerada qaxootiga, ama aad codsanayso lacagta biilka xerada, ama aad doonayso in mushaarkaaga laguugu soo shubo kaarka prepaid-ka ee lagaa siiyay xerada qaxootiga.

Waaxda socdaalka ama emaagareeshinku uma baahna heshiiska shaqada ama u soo sheegista xilliga shaqada la bilaabaayo, si loo gaaro go'aanka codsiga magangalyoddoonista ama badbaadinta kummeelgaarka ah.

## 3. Mushaar bixinta

**Mushaarkaaga waxaa laguugu soo shubi karaa kaarka Prepaid-ka ee xerada qaxootiga lagaa siiyay ama akoonka bankiyada ee dalkaan Finland.** Haddii mushaarkaaga laguugu soo shubaayo kaarka Prepaid-ka, waa inaad xerada qaxootiga u soo gudbisaa heshiiskaaga shaqada, lambarka canshuurta ee shaqo bixiyaha (y-tunnu) iyo lambarka akoonka uu shaqo bixiyuhu ka soo shubaayo mushaarka. Marka xerada qaxootigu ay hesho macluumaadkaas, waxaa ay ku siin doontaa tilmaanbixin ay tahay inaad u gudbiso shaqo bixiyahaaga. Si lacagta loogu soo shubo kaarka Prepaid-ka, waa in shaqo bixiyahaagu uu lacag ku shubi karo akoon ku yaalla dal shisheeye ah.

Shaqo bixiyaha isaga ayaa go'aan ka gaaraaya in uu mushaarka ku soo shubaayo akoon aan ahayn kuwa bangiyada dalkaan Finland iyo inkale. Waad furan kartaa akoon bangi oo dalkaan Finland ah, haddii aad leedahay baasaboor dalkaaga ama kaarka aqoonsiga oo shaqaynaayaa. Waxaa sidoo kale uu Bangigu ku weydiin karaa macluumaad kale, sida lambarka aqoonsiga ama kaarka ciqaamadda. Kharashka ku baxaaya adeegyada bangiga adiga ayaa iska bixinaaya.

## 4. Kaarka canshuurta

**Marka aad shaqo hesho, waxaad u baahan tahay kaarka canshuurta.** Waxaa wanaagsan in aad raadsato kaarka canshuurta kahor inta aadan shaqada bilaabin. Sidoo kale shaqada waxaad bilaabi kartaa adigoo aan haysan kaarka canshuurta, laakiin shaqo bixiyuhu wuxuu kaarka canshuurta kaaga baahan yahay ugu dambayn marka la gaaro xilliga mushaar bixinta. Shaqo bixiyaha ayaa mushaarkaaga ka jaraya canshuurta, iyadoo lagu salaynaayo waxa ku qoran kaarka canshuurta.

Kaarka canshuurta waxaad ka heleysaa xafiiska canshuuraha. Haddii aad u baahan tahay shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa ka caawinaaya sidii aad ku heli lahayd xafiiska canshuuraha, islamarkaana aad danahaaga uga soo dhammaysan lahayd. Faahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan arrimaha canshuurta waxaad ka heleysaa, lambarka adeegga 029 497 050 iyo bogga internetka ee xafiiska canshuuta vero.fi.

## 5. Saamaynta ay shaqdu ku yeelanayso lacagtii biilka xerada

**Mushaarka laga helo shaqada waxaa uu saamayn ku yeelanayaa lacagta biilka xerada.** Lacagta biilka xerada waxaa loogu talaggalay dadka aan wax dakhli ah soo galin ama wax kayd lacageed ah aanu u oollin. Hadii dakhliga ku soo galaa uu yar yahay, oo aadan awoodin inaad ka masruufto nafsad ahaantaada iyo qoyskaaga, waad soo codsan kartaa lacagta biilka xerada. Haddii aad dalbanayso lacagta biilka xerada, waa in codsigaaga aad ku soo sheegtaa dhammaan dakhligaaga iyo wixii hanti ah ee aad haysato. Sidoo kale soo sheeg haddii aad shaqo heshay codsigii lacagta bilika xerada kaddib. Waxaad codsiga ku soo lifaaqdaa warqadda xisaabinta mushaarka ama warqadda warbixinta akoonka, kuwaasoo ay ku qoran tahay cadadka mushaarka.

Iyadoo lagu salaynaayo codsigaaga ayaa sooshaladda hagaha ka ah xerada qaxootiga waxaa ay samaynaysaa xisaabinta arrinkaas, waxaana la qiimaynayaa in adiga ama qoyskaagu aad xaq u leedihiin lacagta biilka xerada iyo inkale. Haddii aabaha ama hooyada qoyska ay aadaan shaqo, waxaa ay saamayn ku yeelanaysaa lacagta biilka xerada ee qoyska oo dhan.

Haddii shaqadii kaa dhammaatay oo markaa dabadeed aad soo codsato lacagta biilka xerada, waa inaad shaqaalaha xerada qaxootiga u soo gudbisaa waraaq uu soo saxiixay shaqo bixiyaha, taasoo ay ku caddahay taariikhda shaqadu ay dhammaatay.

Mushaarku waxaa uu saamayn ku yeelan karaa bixinta lacagta biilka xerada, laba bilood kaddib xilliga ay shaqadu dhammaatay.

Haddii aad u baahan tahay faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan saamaynta u mushaarku ku leeyahay lacagta biilka xerada, waxaad la soo xiriirtaa sooshaladda hagaha ah e xeradaada qaxootiga.

## 6. Degaanka

**Waad ku sii noolaan kartaa xerada qaxootiga, xittaa haddii aad shaqayso.** Haddii uu ku soo galo dakhli joogto ah, xerada qaxootigu waxaa ay adiga kugu soo dallici kartaa kharashka ku saabsan degaanka xerada qaxootiga. Waa inaad siisaa shaqaalaha xerada qaxotiga macluumaadka loo baahan yahay sida (heshiiska shaqada, warqadda xisaabinta mushaarka iyo warqadda warbixinta akonka), si ay xerada qaxootigu qiimayn ugu samayso, inaad bixinayso kharashka la xiriira degganaashahaaga xerada qaxootiga iyo inkale.

**Waxaad sidoo kale u wareegi kartaa degaan adiga uu gaar ah ama mid uu ku siiyay shaqo bixiyaha.** Waxaad xusuusnaataa in aad mar walba u soo gudbiso xerada qaxootiga cinwaankaaga cusub, haddii aad guurto waa inaad ogaataa, in aanay xerada qaooxtigu kugu caawiinayn wax kharash ama lacag ahaan ah oo degaankaaga ku saabsan (tusaale ahaan ijaarka, korontada, biyaha). Marka aad adigu diyaarsanayso degaankaaga kuu gaarka ah, waxaad iska hubisaa arrimaha soo socda:

- Ma in aad degaankaaga ijaar ka bixiisaa?
- Qoyskaagu ma kula guurayaan?

## 7. Waajibaadka waxqabadyada shaqda iyo waxbarashada

**Haddii aad shaqayso maalinka oo dhan, adiga lagaagama baahna inaad ka qaybqaadato howlaha shaqo iyo waxbarasho ee ay xerada qaxootigu diyaariso.** Xaaladaha kale ee taa ka duwan, qofka ku nool xerada qaxootiga waxaa ku waajib ah inuu ka qayb qaato howlaha shaqo iyo waxbarasho ee ay xerada qaxootigu qabanqaabiso.

Haddii shaqadaadu ay tahay shaqo saacado yar ah, islamarkaana howlaha shaqo iyo waxbarasho ee xerada qaxootiga la galaayo xilli ka duwan kan kaltankaaga shaqo, waxaa adiga kugu waajib ah in aad ka qaybqaadato howlahaas shaqo ama waxbarasho ee xerada qaxootiga. U soo sheeg shaqaalaha xerada qaxootiga, haddii aad xilligaaga kaltanka shaqada awgeed, aanad imaan karaynin howlaha waxbarasho iyo shaqo ee ka socda xerada qaxootiga dhexdeeda.

## 8. Daryeelka maalinlaha ah ee ilmaha

**Haddii aad shaqayso maalinka oo dhan, waxaad degmada ka codsan kartaa goob xannaanada caruurta oo ilmahaaga la geeyo.** Xerada qaxootiga ayaa haddii aad u baahato kaa caawin karta codsiga xannaanada carruurta. Xerada qaxotiga ma qabanqaabiso wax ku saabsan daryeelka ilmaha.